



## Caawa ayaa la rajeynayaa in loo codeeyo Dugsiga Dhexe

Golaha Waxbarashada ee Dugsiyada Dadweynaha Portland wuxuu rajeynayaa inay u codeeyaan caawa furitaanka labada dugsi dhexe ee cusub sanad-dugsiyeedka soo socda ee Roseway Heights iyo Harriet Tubman. Dugsiga Roseway Heights iminka wuxuu u addeegaa ardayda fasalada K-8, iyo iyada oo Harriet Tubman uu hadda maran yahay; ka dib markii loo soo wareejiyey intii dhismaha cusub loo dhisiyey iskuulka Faubion K-8.

Qaraarku wuxuu qeyb ka yahay dadaalada ay dugsiyada degmadu ay ku rabaan inay siiyaan arday badan barnaamijiyyada dugsiyada dhexe oo wanaagsan bulshada taariikh ahaan aan la siin addeegii ay u baahaanaayeen.

Sida la qorsheeyey, qorshuhu wuxuu yahay in iskuulada Boise-Eliot/Humboldt, Irvington, Martin Luther King Jr. iyo Sabin K-8 loo bedelo inay noqdaan Dugsiyo Hoose K-5. Afartaasi iskuul waxa ay ardaydooda u diri doonaan Harriet Tubman marka ay soo dhammeystaan dugsiyada hoose. Qaraarkani sidoo kale, wuxuu dhigayaa in la hubiyo in qiimeyn lagu sameynayo caafimaadka guud iyo nabadjelyada Harriet Tubman, oo ay ka mid yihiin in la hubiyo in biyaha laga fiiryo inay leyihiiin curiyaha ledhka, raydoonka, asbestoska, sidoo kalena in aan dhismaha lagu arki karo inuu caaryeestay iyo waxyabaha keeni kara cudurka kansarka.

Iskuulada Lee, Scott iyo Vestal K-8 waxa loo bedeli doonaa inay noqdaan dugsiyo hoose oo ardaydooduna ay tegi doonaan Roseway Heights. IntaaS waxaa dheer, iskuulka Rose City Park waxa loo furi doonaa inuu noqdo dugsi hoose K-5 oo ay yeeshaan ardayda bulshada darisku, ka dibna ardayda u gudbiyaan marka ay gaaraan dugsi dhexe Roseway Heights. Qaraarku wuxuu amrayaa dugsiyada degmada in ay u raadiyaan dhisme ACCESS Academy sida "dhisme joogta ah ama mid ku sii xidha inta hoy rasmi ah loo helayo", iyada oo laga soo rari doono Rose City Park.

Qorshuhu sidoo kale wuxuu amrayaa in xuduudaha la bedelo kuwaas oo saameyn ku yeelan doona tiro iskuulo kale ah, waxaana ka mid ah Beverly Cleary K-8, Alameda K-5, Dugsiga Dhexe ee Beaumont iyo Dugsiyada Sarre ee Madison iyo Grant.

Guddoomiyihii hore ee waxbarashada Carole Smith ayaa ahayd qofkii bilaabay in la furo labada iskuul waqtigii loogu talogalay oo ahayd in la furo sanad-dugsiyeedkani. Dib u dhac ayaa ku yimid qorshihii, si kastaba ha ahaatee iyada oo sida laga warqabo isbedel ku yimid hoggaankii iyo arrimo kaleba. Sanadkani, golaha waxbarashadu waxa ay ku amreen dugsiyada degmada in hore loo sii wado qorshaha lagu furayo iskuulada sanad-dugsiyeedka soo socda ee 2018-2019 kaasi oo ah waqtiga lagu talogalay.

Codeynta caawa waxaa la socon doona wada hadalada goluhu ay yeelan doonaan iyo shirarka qeybo ka mid bulshada.